

Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha Sharafta leh,

Sidaad la socotaan, dugsigeenu wuxuu ku guulaystey in loo doortay inuu ka-qaybgalo barnaamijka Dowladda Victoria ee Dhaqaatiirta joogta dugsiyada Sare.

Ayadoo qayb ka ah barnaamijkan, GP-ga (Dhaqtarka Guud) ayaa ka shaqayn doona dugsiga dhexdiisa si uu u siiyo helitaan lacag la'aan ah ee daryeelka caafimaadka asaasiga ah ardayda dugsiga sare ee dugsigeena.

Waxaan ognahay inay kureyadu yihiin kooxo da'eedka ugu yar inay helaan GP-yada, waxaan kaloo ognahay in dhibaatooyin caafimaad oo badan kuwaas oo cawaaqib ku leh qaangaarnimada kuwaas oo bilowda waqtigan noloshooda ah. Barnaamijkan wuxuu raadinayaa inuu wax ka qabto arimahan.

Waxaad ku caawin kartaa barnaamijkan inuu guulaysto adoo kala hadla ilmahaaga wax ku saabsan barnaamijkan iyo adoo ku dhiirigeliya inay u tagaan GP-ga haddii ay u baahdaan daryeelka caafimaadka asaasiga ah. Ardaydu waxay awoodi doonaan inay ayagu helaan GP-ga, ama adiga ayaa ballan u samayn kara adoo la xiriira hoggaanka barnaamijka Dhaqaatiirta joogta dugsiyada Sare ee dugsiga. Ku soo-dhawow inaad timaado la-tashigooda, haddii/markii loo baahdo.

### **MAXUU SAMAYN DOONAA GP-gu?**

GP-gu wuxuu ardayda siinayaa adeegyo la mid ah sida noocyada caadiga ah ee ay GP-yadu bulshada siiyaan, oo ay ka mid yihiin ka arkidda ardayda wax ku saabsan caafimaadkooda jidheed iyo dhimireed, arimaha caafimaadka galmada iyo taranka. Gp-yadu waxay kaloo samayn karaan meel-u-dirid adeegyada caafimaad ee kale haddii loo baahdo.

GP-yadu waxay soo-dirayaan la-tashiyada biilka ee Medicare-ka, sidaas darteed ma jiri doonaan qarashyo adeegan ah oo jeebka ay ka bixinayaan qoyskaaga.

Barnaamijkan looguma talagelin inuu baddelo nadaamyadii caafimaad ee hadda jira ee qoyskaaga ay haystaan. GP-gu dugsiga jooga wuxuu siin karaa baddel fudud ee daryeelka asaasiga ah dugsiga dhexdiisa, wuxuuna dhiirigelin karaa helitaanka daryeelka caafimaadka ee ardayda ayadoo uusan jirin wax xiriir ah ay la leeyihiin GP-ga.

Barnaamijka waxaa loolajeedaa inuu siiyo helitaanka wacan ee daryeelka asaasiga ah ardayda dugsiyada Sare. Sidaas darteed, waalidiinta, daryeelayaasha, ilaaliyeyaasha iyo xubnaha qoyska ee kale ma awoodaan inay waqtigan isticmaalaan adeeggan.

GP-yada oo dhan ee barnaamijkan waxay qaadan doonaan tababarka caafimaadka ee qaangaarada waxayna fahmi doonaan baahiyaha caafimaad iyo fayoobi ee kureyada.

### **HELIDDA GP-ga**

Guud ahaan, ardaydu waxay samayn karaan ballan inay arkaan GP-ga. Shuruucda Victoria way ku caddahay sida iyo marka ardayda ay ogolaan karaan daaweynta caafimaad ee GP-ga:

- Ardayda dhalinta qaangaarka ah ayaga ayaa ogolaan kara daaweyntooda caafimaad.
- Ardayda dhalinta aan qaangaarka ahayn ma samayn karaan ogolaanshaha daaweyntooda caafimaad.

Dhalinta qaangaarka ah waa ardayda ka yar da'da 18 sano kuwaas la xaqiijiyey inay awoodaan doonista iyo helidda daryeelka caafimaad ee arinta caafimaad oo u gaarka ah. GP-gu wuxuu qiimayn doonaa haddii ardaygu yahay dhalin qaangaarka ah marka loo eego arinta ay u doonayaan daaweynta caafimaad.

Haddii GP-gu u malaynayo inuu yahay dhalin qaangaarka ah, way arki karaan adiga la'aanta. GP-gu wuxuu badanaa ku dhiirigelin doonaa ilmahaaga inuu kugu soo daro daryeelkooda, ayadoo uu GP-gu fahamsan yahay inaad tahay il muhiim ah ee macluumaadka iyo taageerada ilmahaaga markay arintu taagan tahay caafimaadkooda. Haddii GP-gu u malaynayo in ardaygaagu uusan ahayn dhalin qaangaarka ah, ogolaanshahaaga ayaa la dooni doonaa haddii ardaygu jecel yahay inuu wato daaweynta.

Macluumaad badan oo ku saabsan ogolaanshaha, qarsoodinimada iyo daaweynta caafimaad ee GP-ga wuxuu ku jiraa xaashidan macluumaadka, kuwaas oo laga heli karo website-ka barnaamijka Dhaqaatiirta joogta dugsiyada Sare: <http://www.education.vic.gov.au/about/programs/health/Pages/doctors-secondary-schools.aspx>.

Haddii aad qabto wax dareeno ama su'aalo ah oo ku saabsan barnaamijka Dhaqaatiirta joogta dugsiyada Sare, waxaad kala hadli kartaa dugsiga.